



HORDHACA BARNAAMIJKA

Hindisaha Daaddihiye waxa uu ujeedkiisu yahay in la xoojiyo codka muwaaddiniinta Soomaaliyeed, ayna helaan fursado codkooda ay ku gaarsiin karaan miiska go'aan gaarista, oo ay isugu yimaadan hogaamiyayaasha iyo daneeyayaasha arrimaha bulshada. Daadihiye waxaa maal gelisay Raagsan oo ah shirkad maxali ah oo bulshada u adeegta. Si loo xaqiijiyo in dhamaan qeybaha kala duwan ee bulshada in ay helaan fursado ay uga qeyb galaan barnaamijka, Daaddihiye waxa uu adeegsanayaa aaladaha kala duwan ee bulshada lagula xariiro sida sahan cilmibaaris oo ka fool ka fool ah, lambar gaaban oo dadweynuhu si bilaash ah u soo wici karaan, idaacad, iyo farriimo qoraal. Aaladahaas kala duwan waxa ay xaqiijinayaan in si waafi ah loo aruriyo aragtiyaha shacabka, laguna gaaro dhinacyada kala duwan ee bulshada, dhaqan ahaan iyo dhaqaale ahaanba. Waxaan sidoo kale taabbagelinnay hannaan jawaab celin, oo si hufan loo diyaariyay, si aan u xaqiijinno in xogta aan soo ururinno ay noqoto mid gaarta dadkii loogu talagalay iyo siyaasad dejiyayaasha.



Aragtida fog ee barnaamijka Daaddihiye ayaa ah in uu suurageliyo in madaxda iyo danlayda ugu muhiimsan ay helaan fursad ay si toos ah ugu dhagaystaan aragtiyaha, walaacyada iyo afkaaraha dadweynaha, kuwaas oo aan badanaa si qumman loola wadaagin siyaasad dejiyayaasha amaba la iska indhatiro. Daaddihiye waxa uu siinayaa waddo lagu gilgilkaro aragtiyaha hadda jiro oo ku dhisan fikrado ka yimid koox yar oo bulshada qeybaheeda sare (xulka) ka mid ah kuwaas oo badanaa keligood hoggaamiya doodaha go'aammada looga gaaro arrimaha danta guud. Hababka kala duwan ee bulshada looga talagelinaayo barnaamijka waxa ay abuurayaan fursado horseedaya talawadaag dadweyne oo heer sare ah. Natiijada waraysiyada iyo wadhadallada lalayeeshay dadweynaha waxaa lagu soo bandhigayaa bogga internetka ee "www.daadihiye.so", oo ah bog si fudud xogta looga daalacan karo, lagana heli karo xog faahfaahsan.

Taxanahan wargelinta ah, waxa aan idin kula wadaagi doonnaanatiijadii mashruuceenna tijaabada ahaa ee Muqdisho laga fuliyay oo hadafkiisu ahaa in la gaaro 2,500 oo qof. Hawl-wadeeno ka kooban adeegayaal bulsho oo karti leh, si xirfadaysanna loo tababaray ayaa xogtaan soo aruuriyay, kuwaas oo fahan qoto dheer ka haysta xaaladdadalka, xirfadna u leh in ay diiwaangeliyaan caqabadaha bulshada wajahaya, adeegyada ay u baahan yihiin, iyo sida ay ula falgali karaandawladda loona dejinlahaa hortebin sax ah oo ka tarjumeysa baahiyaha dadka.

Haddii aad danaynaysid in aad la socotid xog dheeraad ah oo ku saabsan Daaddihiye, ama aad jeceshahay in aad nala wadaagto aragtidaada ku aaddan hawlaheenna, waxa aad nagala soo xiriirkartaa daadihiye@raagsan.com. Fadlan booqo boggeenna internetka www.daadihiye.so si aa u heshid xog dheeraadah oo ku saabsan barnaamijka. Waxa aan rajaynaynaa in aad ka bogan doontid akhrinta wargelintan, aadna booqan doontid boggeentainternetka si aad wax badan uga ogaatidDaaddihiye.

Ifafaale wacan,

Badra Yuusuf

Maamulaha ShirkaddaRaagsan

SIDEE AYAAN ULA XIRIIRNAA BULSHADA?



Sahan Cilmi-baaris



Madal Dadweyne



Barnaamij Idaacad



Wadahadal Lala Yeelanayo
Siyaasad-dejiyeyaasha




Wicitaanka Dadweynaha



Mareegta Isla-falgalka
Online-ka

SAAMAYNTA LA FILAYO



Barnaamijka Daaddihiye ayaa waxaa laga filanayaa, ujeedkiisuna yahay, in lagu qaabeeyowada shaqeynta iyo wada hadalka ay bulshada la yeelan karto dawladda, annaga oo soo saaraynaxalal saldhiggoodu yahay aqoon kuwaas oo ka tala bixiya sida ugu wanaagsan oo ay muwaaddiniintu qeyb uga noqon karaan talada, loona yarayn lahaa caqabadaha ka jira xiriirka siyaasaddejiyeyaasha iyo dadweynaha. Waxa aan sidoo kale rajaynaynaa inaan la imaanno farsamooyinka ugu wanaagsan, diiwaangelinno casharrada laga bartay wada-hadallada tooska ah iyo wada-shaqeyn dhexmarta dawladda iyo muwaadiniinta. Waxa aan ku hammi weynahay in Daaddihiye uu horumariyo isla xisaabtan bulsho oo uuna abuuro bulsho xooggan, xog ogaal ah, oo isku xiran.

NATIJADA SOO BAXDAY

Si Kooban

Caqabada ugu badan ee la soo tebiyay

- Dhac
- Shaqlo la'aan
- Nadaafad xumo
- Amniga iyo badqabka

Caqabadaha dhaqaale ee ugu muhiimsan

- Sare-u-kaca kharashka nolasha
- Kororka sicirka cunnooyinka
- Kororka qarashka korontada
- Kaabayayaasha jidadka oo liita

Caqabadaha bulsho ee ugu muhiimsan

- Helidda waxbarasho iyo adeeg caafimaad oo tayo leh
- Helidda caddaalad
- Isticmaalka daroogada
- Helidda biyo nadiif ah

Adeegyada loogu baahida badan yahay

- Amni
- Shaqo abuur
- Maaraynta qashinka
- Xakamaynta sicirbararka

Adeegyada dhaqaale ee lagu xallinayo caqabadaha

- Hagaajinta kaabayaasha waddooyinka
- Tababar & horumarin xirfad
- Tayodhowrka badeecooyinka la soo dhoofiyo

Adeegyada xasaasiga ah ee loo baahan yahay

- Waxbarasho tayo leh
- Adeeg caafimaad oo heersare ah
- Koronto qiime jaban oo la awoodi karo

DADKA AAN IS MAQALNAY


1530 jawaab-bixye

17 Degmo



Goobaha xog-ururinta


1530 qof oo ka mid ah dadka deggan magaalada Muqdisho ayaa nooga warramay caqabadaha haysta, adeegyada ay u baahan yihiin iyo sida dadka canshuurbixiyeyaasha ah ay tahay in ay u qaabeeyaan waxyaabaha hortebinta u leh dawladda hoose. Xogaha waxaa laga soo uriyay 17-ka degmo ee gobolka Banaadir. Qeybaha kala duwan ee dadka waxaa laga arki karaashaxda hoose.




Shaxda 1-aad: Dadka aan waraysiga la yeelannay ee dogmooyinka kala duwan

XOGTA DADKA

832 oo rag ah iyo 698 oo dumar ah ayaa la waraystay bishii Diseembar. 1530 oo ka mid ah dadka la waraystay, oo ah badi tirada guud, waxa ay da'doodu u dhaxaysay 25-34 iyo 35-54.




Shaxda 2-aad: Jinsiga jawaab bixiyeyaasha




Shaxda 3-aad: Qeybaha dadka la waraystay

70% (1070) oo ka mid ah jawaab bixiyeyaasha waxa ay ahaayeen dadka degaanka, 16% (244) waxa ay sheegeen in ay yihiin muhaajiriin dhaqaale, halka 9.9% (152) ay ahaayeen dadka dalka gudahiisa ku barakacay (IDPs).



37.6% (575) dadka la waraystay waxa ay haysteen shahaado jaamacadeed, badankoodna waxa ay ahaayeen shaqo la'aan (39.5%, 604).



Shaxda 4-aad: Waxbarasha iyo Heerka Shaqada



Sawirro laga soo qaaday wareysiyo ay sameeyeen hawlwadeennadii tababarnaa ee Adeegayaasha Bulshada.


MAXAA NOO SOO BAXAY?

Caqabadaha ay la kulmeen shacabka deggan Muqdisho

Dadka aan waraysannay ayaa nala wadaagay dhibaatooyinka bulsho, dhaqaale iyo deegaan ee ay la kulmaan dadka Muqdisho deggan. Caqabadahan waxaa lagu muujiyay qeybta hoose.


Caqabadaha Bulshada

Sida ku cad natiijada xog ururinta, caqabadaha ugu weyn ee bulshada haysta waxaa ka mid ah xatooyada, dhaca iyo boobka hantida, arrimo la xariira amniga iyo badqabka bulshada, helitaanka caddaaladda, saboolnimada, waxbarashada, daryeelkacaafimaadka, iyo waddooyinka xiran.



CAQABADAHA DHAQAALE


Shaqo la'aan, sicirbarar, sare-u-kaca qiimaha cunnada, kororka kharashaadka nolosha, iyo kaabayaasha waddooyinka oo liita ayaa ahaa caqabadihii ugu badnaa ee ay soo gudbiyaan dadka Muqdisho deggan kuwaas oo la xiriiray dhaqaalaha.



Shaxda 5-aad: Caqabadaha dhaqaale ee la soo gudbiyay

CAQABADAHA DEGAANKA

Maaraynta qashinka oo liidata, dhibaatooyinka ka dhasha caagaggaa iyo bacaha wasaqeeya bii'ada, wasakhowga biyaha, maaraynta qashinsaarka (bullaacadaha), iyo nabaadguurka carradaayaa ahaa caqabadaha ugu badan ee ay soo gudbiyeen dadkadeggan Muqdisho.



Shaxda 6-aad: Caqabadaha degaanka ee la soo gudbiyay

DADKA WAXA AY NOO SHEEGAYAAN SIDA CAQABADAHANI AY NOLOSHOODA U SAAMEEYEEN

Dhac

"Bishii hore, walaalkay oo qoyskeenna u shaqeeya, hooyona caawinaya, ayaa waxaa dhacay kooxo hubaysan. Bajaajtiisii ayaa laga dhacay, oo hadda qoyska waxaa soo wajahday xaalad dhaqaale xumo oo hadda ma haysanno meel kale oo dakhli naga soo galo. Markii arrintii aan booliska u sheegnay kiiskeenni lama baarin oo nama caawin." – Muwaaddin (lab), deggan Kaaraan.

Sare-u-kaca kharashka nolosha

"Sare u kaca ku yimid kharashaadka nolosha iyo cuntada waxa ay sababeen in dadku waxyaabo aysan gadan karin, dawladduna ma xakamayso sicirka cunnooyinka. Maalin kasta waxaa sii qaaliyooba badeecooyinka. Mushaarkayga oo iska yaraa dartiis, bixinta kharashaadka iyo kirada marba marka ka danbaybsa way sii adkaanaysaa." – Barakace dhaqaale (dheddig), deggan Shibis.

Xadgudubka Loo Gaysto Haweenka

"Kooxo hubaysan ayaa kufsaday gabar qaraabadayda ah. Waxa ay burburiyeen hankeedii mustaqbalka maadaama dhacdadani saamaysay nolosheeda iyo tan qoyskeedaba. Hadda waxa ay wajahaysaa ceebeyn uga imaanaysa bulshada." – Muwaaddin (dheddig), deggan Shibis.

Maaraynta qashinka oo liidata

"Xaafadaheenna waxaa yaalla qashin badan, kaasoo sababaya cudurro, maadaama dawladdu aysan waxba ka qabanayn." – Gabar dib ugu soo noqotay Wadajir.

Shaqo la'aan


"Shaqo la'aan daran ayaa halkan ka jirta. Waxaan ahay arday dhawaan jaamacad ka baxay. Saaxiibbadaydii maadaama reerhoodu xiriir fiican leeyihiin shaqo ayay heleen. Anigana hadda bajaaj ayaan wadaa (ka shaqeeyaa), waana arrin niyad jab leh." – Muwaaddin (lab), deggan Kaaraan.

ADEEGYADA AY DADKU U BAAHAN YIHIIN

Adeeg bixinta waxtarka leh ee dawladda waxaa aasaas u ah bixinta adeegyo ku habboon baahiyaha bulshada. Sahankii la sameeyay waxaa lagu ogaaday adeegyada kala duwan ee ay u baahan yihiin dadweynaha Muqdisho. Adeegyadaasi waxaa loo kala saaray kuwo bulsho, dhaqaale, iyo degaan.

Adeegyada bulsho

Waxbarasho (72.6%), daryeel caafimaad (64.8%), amni (64.6%), koronto (50.5%), iyo kaalmo cunno (46.5%) ayaa noqday 5-ta baahi ugu sarreeyay ee ay jawaabbixiyeyaashu soo gudbiyeen.



Shaxda 7-aad: Adeegyada bulsho ee loo baahan yahay

Amni

"Xaaladda amni darro ee degmada waa mid aad u sarraysa, taasoo keentay in dad badan cabsi ku jiraan. Waxaan ku talinayaa in amniga wax laga qabto. Tuugada/mooryaanta waa in wax laga qabtaa si dadku nabad u helo." – Muwaaddin (dheddig), deggan Kaaraan.

Waxbarasho

"Dawladdu waa in la timaadda qorshayaasha lagu horumarin lahaa adeegyada bulshadu u baahan tahay sida waxbarasho tayadeedu sarrayso" – Muwaaddin (dheddig), deggan Heliwaa.

Daryeel Caafimaad

"Waxa aan u baahannahay adeeg caafimaad oo bilaash ah. Adeegyada caafimaadku aad ayay muhiim noogu yihiin.

Daryeelka caafimaad waa in ay heli karaan dadka aan awoodin in iska bixiyaan". – Muwaaddin (lab), Hodan.

Koronto


"Dawladdu waa in ay dadka siisaa koronto joogto ah." – Muwaaddin (lab), Deyniile.

Marin-u-Helidda Caddaalad

"Maxkamadaha badankood si wacan uma shaqaynayaan, xafiisyada degmaada waxaa ka jira musuqmaasuq. Dadka qaar waxaa la xukumaa caddayn la'aan, caddaaladduna waxaa go'aamiya cidda lacagta leh. Dawladdu waa in ay ka caawisaa dadka sidii ay u heli lahaayeen caddaalad, ayna dhidibbada u taagtaa nidaam garsoor caaddil ao oo madax bannaan." – Barakace (lab), Warta Nabadda.

ADEEGYDA DHAQAALE

Horumarinta kaabayaasha jidadka (51%), kordhinta xirfadaha iyo tababarka (44.5%), helidda internet (42.2%), tayodhowrka badeecooyinka la soo dhoofsado iyo kuwa dalka gudahiisalagu sameeyo (36.4%), iyo xadaynta sicirka (30.9%) ayaa lagu sheegay adeegyada dhaqaale ee ay dadku u baahan yihiin.



Shaxda 8-aad Adeegyada dhaqaale ee loo baahan yahay

Shaqo Abuur


"Ku dhawaad 5,000 oo arday ayaa sanad walba ka qalinjebiya jaamacadaha dalka, kuwaas oo aan helin fursado shaqo. Waxaa jira baahi shaqo, oo ay gaar ahaan qabaan dhallinyarada iyo haweenka." – Muwaaddin (dheddig), deggan Warta Nabadda.

Horumarinta Jidadka Halbowlayaasha ah

"Cashuurta dadka laga qaado waa in loogu dhisaa waddooyin." – Barakace duruuf dhaqaale (lab), deggan, Dharkeynley

ADEEGYADA DEGAANKA

Adeegyada maaraynta iyo ururinta qashinka (61.8%), barnaamijka dib-u-warshadaynta caagagga (46.1%), adeegyada tayodhowrka biyaha (37.9%), iyo dhisidda nidaamka maaraynta daadadka iyo bullaacadaha (27.8%) ayaa ahaa adeegyada ilaalinta degaanka ee la soo tebiyay.



Shaxda 9-aad: Adeegyada degaanka ee loo baahan yahay

Maaraynta qashinka

"Wadajir waxa ay u baahan tahay adeegyada maaraynta qashinka. Dadka qaar waxa ay qashinka ku soo tuuraan jidadka, tani oo saamaysa caafimaadka, sababna u noqota cudurro." – Muwaaddin (lab), deggan Wadajir.

"Dawladda waxa aan ka rabnaa in ay dhisto nidaamka bullaacadaha ayna si fiican u maarayso ururinta qashinka." – Muwaaddin (dheddig), deggan Hodan.

CADADKA SOO SOCDA...

Bisha Jannaayo, Wargeliyaha Daadihiye waxa uu iftiimin doonaa aragtida bulshada ee ku aaddan sida wax looga qaban karo caqabadaha haysta iyo sida sare loogu qaadi karo isdhexgalka dawladda hoose iyo daweynaha, si loo qaabeeyo mustaqbal horumar leh oo ay yeeshaan degmooyinka.

